



PORTRLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

Ku Dhawaaqidda Maamulaha Cusub ee Markham, Lydia Poole

July 2020

Bulshada Markham ee Qaaliga ah,

Waxa aan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqo in Lydia Poole, oo ah hogaamiyaha soo baxaya ee Dugsiyada Dadweynaha Portland oo leh taariikh waxqabad oo midaynta shaqaalaha ah, in ay noqon doonto maamulaha xiga ee Dugsiga Hoose ee Markham.

Waxa ay xilka kala wareegi doontaa Shawn Garnett, ooh awl-gab galaya ka dib 30 sano oo ay joogtay PPS, oo ay ku jiraan sagaalkii ugu dambeeyey oo ay ahayd maamulaha Markham. Waxa aanu ugu mahadnaqaynaa Shawn adeegeedii iyo hagarbaxeedii waxana aanu u rajaynaynaa wanaag dhamaantii.

Lydia waxa ay ka soo shaqaynaysay PPS illaa 2008. Waxa ay ka bilawday shaqadeedii macalinimo Dugsiga Hoose ee Abernethy, iyada oo dhigaysa dhamaan maadooyinka fasilada 3-5. 2012 kii waxa ay ka noqotay kaaliyaha maamulaha PPS Head Start, waxana ay u wareegtay dugsiga Bridger K-8. Waxa ay ka shaqaynaysay mansabkaas mudo laba sano ah. Laga bilaabo 2015-2017 waxa ay maamule ahaan uga shaqaynaysay dugsiga Bridger K-8 halkaas oo ay hogaamisay dedaaldii sinaanshaha jinsiyeed ee dugsiga oo ay diiradda saartay dhismaha kalsoonida iyo wadajirka iyada oo u maraysay wada xidhiidh xoogan. Waxa ay turjuntay aragtidi dugsiga – ee la odhanayey "Arday Walba, Maalin Walba, ku Wanaagsan Dhan Walba" – si ay uga dhigto mid ay heli karaan dhamaan ardayda iyo shaqaaluhu.

Saddexdii sano ee ugu dambeeyey, Lydia waxa ay kaga shaqaysay kaaliye maamule ahaan Dugsiga Hoose ee Scott, iyada oo ka caawinaysa hogaaminta bedelka xarunta K-8. Waxa ay iskaashi ka samaysay qorista hadafka, aragtida iyo qiyamka aasaasiga ah ee dugsiga waxana ay ku hogaamisay guddiga cimilada ee dugsigeega qiyamka waxdhigista ee aynu aadka ugu dhaadano iyada oo qabanaysa isu-imaatino dugsiga oo dhan ah.

Lydia waxa ay ka qaadatay Shahaadada heerka koowaad Xirfadaha Daraasadaha Isku-dhafan kuliyadda Cascad, iyo shahaado heerka labaad ah oo Waxbarashada ah kuliyadda Warner Pacific. Waxa ay ka heshay rukhsadeheeda Maamul ee bilaw iyo waditaan Jaamacadda Gobolka Portland.

Fadlan igu soo biir ku soo dhaweynta Maamule Poole Markham.

Shawn Bird, Ed.D.
Madaxa Dugsiyada



Lydia Poole

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.